



DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA XISAABIYAHHA GUUD EE DAWLADDA

WARBIXIN MAALIYADEEDKA SADDAX
BILOODLAHA KOOWAAD EE JAN - MAR
2024

APRIL 2024

WARBIXIN MAALIYADEEDKA

Saddax biloodlaha koowaad 1^{da} Janaayo – 31^{da} Maarso 2024

Waxaa soo saaray Warbixintaan

XAFIISKA XIISAABIYAHHA GUUD EE DAWLADDA

Waxaad ka heli kartaa Warbixintaan

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: info@oags.gov.so

Liiska Shaxaha

Shaxda 1 ^{aad} : Odooroska iyo Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Mar 2024	8
Shaxda 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Jan-Mar, 2020-2024	8
Shaxda 3 ^{aad} : Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar, 2020-2024	9
Shaxda 4 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Canshuraha Jan-Mar, 2020-2024	10
Shaxda 5 ^{aad} : Dakhliyada Kale Jan-Mar, 2020-2024	11
Shaxda 6 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Jan-Mar, 2020-2024	12
Shaxda 7 ^{aad} : Deeq labo dhinacle ah Jan-Mar, 2020-2024	12
Shaxda 8 ^{aad} : Deeqda Dhinacyada Badan Jan-Mar, 2020-2024	12
Shaxda 9 ^{aad} : Dakhliga Gudaha Vs Kharashaadka Dawladda Jan-Mar, 2020-2024	13
Shaxda 10 ^{aad} : Dhaqangelint Miisaaniyadda sannadka 2024	14
Shaxda 11 ^{aad} : Dhaqan gelint Miisaaniyadda 2024 - Hay'adaha Dawladda	14
Shaxda 12 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka Hay'adaha Jan-Feb, 2020-2024	14
Shaxda 13 ^{aad} : Noocyada Kharashaadka Jan-Mar, 2020-2024	15
Shaxda 14 ^{aad} : Mushaaraadka Shaqaalaha Jan-Mar, 2020-2024	16
Shaxda 15 ^{aad} : Isticmaalka Agabka iyo Adeega Jan-Mar, 2020-2024	18
Shaxda 16 ^{aad} : Dulsaarka Daymaha Jan-Mar, 2020-2024	21
Shaxda 17 ^{aad} : Kabka Jan-Mar, 2020-2024	21
Shaxda 18 ^{aad} : Deeqaha Jan-Mar, 2020-2024	21
Shaxda 19 ^{aad} : Kharashaadka la siiyey Dawlad Goboleedyada iyo Hay'ado kale Jan-Mar, 2020-2024	22
Shaxda 20 ^{aad} : Faa'idada Bulshada Jan-Mar, 2020-2024	22
Shaxda 21 ^{aad} : Hantida aan Maaliyadda ahayn Jan-Mar, 2020-2024	23
Shaxda 22 ^{aad} : Dib u bixinta Daymaha Jan-Mar, 2020-2024	23

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1 ^{aad} : Boqolayda Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha	8
Jaantuska 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Mar, 2020-2024	8
Jaantuska 3 ^{aad} : Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar, 2020-2024	9
Jaantuska 4 ^{aa} : Dkhliga Bille aha Jan-Mar, 2020-2024	10
Jaantuska 5 ^{aad} : Kororka dakhliga Gudaha Jan-Mar 2020-2024	10
Jaantuska 6 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan-Mar, 2020-2024	11
Jaantuska 7 ^{aad} : Kharashaadka Hay'adaha Jan-Mar, 2020-2024	15
Jaantuska 8 ^{aad} : Kharashka Bille ah Jan-Mar, 2020-2024	16
Jaantuska 9 ^{aad} : Boqolayda Mushaarka Hay'adaha amniga iyo Hay'adaha kale	16
Jaantuska 10 ^{aad} : Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale	16
Jaantuska 11 ^{aad} : Kharashaadka Howl-fulinta	19
Jaantuska 12 ^{aad} : Kharashaadak Safarka & Shirarka	19
Jaantuska 13 ^{aad} : Kharashaadka Kirooyinka	19
Jaantuska 14 ^{aad} : Kharashaadka kale ee Howl-fulinta	20
Jaantuska 15 ^{aad} : Kharashaadka Howlglada Ciidamada	20
Jaantuska 16 ^{aad} : Kharashaadka Guud ee kale	20

TUSMADA WARBIXINTA

<i>Liiska Shaxaha</i>	<i>3</i>
<i>Liiska Jaantusyada</i>	<i>3</i>
<i>CADDAYNTA WAAJIBAADKA</i>	<i>5</i>
<i>1.0 FAALO GUUD.....</i>	<i>6</i>
<i>2.0 DULMAR GUUD IYO FALANQAYN EE XISAABXIRKA JAN-MAR 2024</i>	<i>8</i>
<i>2.1 DHABTA DAKHLIGA DAWLADDA JAN – MAR 2020 - 2024</i>	<i>8</i>
2.1.0 DAKHIGA GUDAHA.....	9
2.1.1 Deeqaha Dibadda	12
<i>2.2 MIISAANIYADDA IYO DHABTA KHARASHAADKA EE SANNADKA 2024</i>	<i>14</i>
<i>2.3 DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA JAN-MAR, 2020-2024.....</i>	<i>14</i>
2.3.0 Noocyada Kharashaadka	15
<i>3.0 MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA.....</i>	<i>24</i>
<i>4.0 MUUQAALKA ISBARBARDHIGGA SAADAASHA MIISAANIYADDA IYO NATIJADA DHABTA AH</i>	<i>25</i>
<i>5.0 MUUQAALKA QULQULKA LACAGTA CADDAANKA AH</i>	<i>26</i>
<i>6.0 ISTICMAALKA MIISANIYADDA EE HAY'ADAHA DAWLADDA.....</i>	<i>27</i>
<i>7.0 MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DAWLADDA.....</i>	<i>29</i>
<i>8.0 FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAABXIRKA.....</i>	<i>37</i>


CADDAYNTA WAAJIBAADKA

Warbixinta maaliyadeed ee ku qoran kana bilaabata bogga 7^{aad} kuna eg bogga 44^{aad} waxaa loo soo diyaariyay hab waafaqsan sharciga iyo xeer nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 (PFM Act-2019). Sidoo kale, si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Qodobka 44^{aad} faqradiisa 2^{aad} ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud waxa uu farayaa: Sarkaal Idman kasta ee hay'adaha Dawladda waa in uu warbixin saddax biloodle ah usoo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud xisaabaadka hay'adaha Dawladda. Waxa sidoo kale uu qodobka 43^{aad} faqradiisa 1^{aad} farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dawladda in uu wargeliyo dhammaan hay'adaha Dawladda, Dawladaha hoose iyo Shirkadaha Dawladu leedahay nidaam xisaabeedka ee laga doonayo in ay dhaqan geliyaan. Si waafaqsan qodobkaas kor ku xusan, Xisaabiyaha Guud ee Dawladda waxa uu qaatay nidaam xisaabeedyada caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) marka uu diyaarinaayo xisaab-xirka Dawladda.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu markasta soo diyaariyaa xisaabxirka Dawladda, isagoo ku soo bandhiga dhammaan macluumaadka iyo faahfaahinnada lagama maarmaanka u ah, fahanka caddaymaha maaliyadeed ee koobaya dhaq-dhaqaaqa maaliyadeed ee Dawladda. Haddaba, waxaan halkan ka caddaynayaa in dhammaan xisaabaadka ku qoran warbixinnada maaliyadeed ay waafaqsanyihiin xisaabaadka ku qoran buugaagta iyo diiwaanka maaliyadeed ee Dawladda.

Waxa aan sidoo kale qirayaa in xisaab-xirka Dawladda Federaalka Soomaaliya ee sannad maaliyadeedka rubaciisa kowaad ee ku dhammaaday 31^{da} March 2024 loo soo diyaariyay si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2022 iyo sidoo kale Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).


Abdirahman Mohamed Anas
Xisaabiyaha Guud ee Dawladda



1.0 FAALO GUUD

1.1 DULMARKA GUUD EE XISAABXIRKA

Xisaab-xirka iyo warbixin maaliyadeedka la socda waxaa had iyo jeer lagu soo gudbiyaa hawl-qabadka Dawladda ee dhinaca maaliyadda ee sannad kasta. Sidaas darteed, xisaabxirkani waxa uu khuseeyaa hawlqabadka dawladda ee sannad maaliyadeedka rubaciisa koowaad ee ku dhammaaday 31^{da} March 2024 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si kooban u helo sida ay u dheceen dhammaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee ay dawladdu fulisay iyo muuqaalka maaliyadeed ee Dawladda ee dhammaadka rubaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2024. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda ayaa isu keenay warbixin maaliyadeedka guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawlada kaddibna soo saaray warbixintaan.

Xisaab-xirka rubaciisa 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2024, waxaa lagu soo gudbiyay oo lagu soo koobay keliya ka warbixinta howlaha dawladda ee ku jira miisaaniyadda guud ee Dawladda, rubaciisa 1^{aad} sannadka 2024 kaasoo horay u ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya. Sidaas darteed, iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), xisaab-xirkani waxaa uu khuseeyaa keliya warbixinta dakhliga iyo kharashaadka ku jiray qiyaasta Miisaaniyadda Dawladda ee rubaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2024. Sidoo kale waxa aanan ku jirin oo aan warbixintan lagu soo darin Dakhliga iyo kharashaadka aan ku jirin miisaaniyadda ee ay isticmaaleen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda intii lagu guda jiray isla rubaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka kor ku xusan.

Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo warbixinta dakhliga dhabta ah ee soo galay Dawladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah uga baxay hawlaha Dawladda, waxaa loo soo bandhigaa sidii ay ugu suurto galin lahayd Dawladda Federaalka Soomaaliya in ay qaadato go'aanada muhiimka u ah horumarinta danaha dhaqaale iyo guud ahaan istiraatiijiyadaha fog ee qaranka iyo danaha iyo istiraatiijiyadaha qaranka ee muhiimka u ah horumarka dhaqaale ee dalka. Warbixintan rubaca 1^{aad} ee sannadka ah waxaa ku dhan guud ahaan waxyaabihii u suurtagalay wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee u qorshaysnaa in la fuliyo sannad maaliyadeedkan.

Hay'adaha dawladda ee ku jiray qoondada Miisaaniyadda Dawladda ee laga diyaariyay warbixintaan ka eeg faahfaahin tirsin yahay 2.1 (c).

1.2 Qaabka iyo Muuqaalada ay ka Kooban tahay Xisaab Xirka

Warbixinta xisaab-xirkan waxaa loo soo diyaariyay iyada oo la raacayo Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017). Guud ahaan xisaabaadka Dawladda waxaa lagu maamulay laguna saleeyay hab-xisaabeedka lacagta caddaanka ah ee faraya in la aqoonsado dhaqdhaqaaqa maaliyadeed keliya markii si dhab ah lacagta loo helo ama loo bixiyo.

Hadaba, xisaab-xirkani waxaa loo soo gudbiyay sida ku cad qaybta 1^{aad} ee isla Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), taasoo waajibinaysa in macluumaadka soo socda la shaaciyo:

1.2.1 Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka

Sida uu qabo Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) gaar ahaan faqrada kala ah 1.3.12 iyo 1.3.13, muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka waa in lagu soo gudbiyaa wadarta dakhliga soo galay iyo kharashaadkii ka baxay Dawladda. Sidoo kale, waxaa lagu soo bandhigaa farqiga u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka sannadka, si loo muujiyo haraaga ku soo haray (Dheeri/(Dhiman) Khasnada Dawladda. Waxaa kale oo lagu soo bandhigaa ilaha dakhliga ka soo galo Dawladda iyo meelaha lagu bixiyo.

1.2.2 Muuqaalka Isbarbardhigga Ku talagalka iyo Dhabta Dakhliga

Warbixintaan waxaa la isku barbardhigaa, kutalagalka qiyaasta dakhliga miisaaniyadda Dawladda iyo dakhliga loo helay. Waxa ay iftiiminaysaa inta uu le'eg yahay dakhliga soo galay Dawladda iyo sida loo kharash gareeyay si waafaqsan xeerka miisaaniyadda uu ogolaaday Golaha Baarlamaanku in loo isticmaalo dakhliga Dawladda.

1.2.3 Xeerarka Xisaabeed

Waa xeerarka, axdiyada, mabaadi'da, shuruucda u gaarka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya lana dhaqan galiyey intii lagu guda jiray diyaarinta iyo soo gudbinta Xisaab-xirka Dawladda.

1.2.4 Faahfaahinada iyo Sharaxaada Xisaab-xirka

Faahfaahinnada la socda Xisaab-xirka waxa ay ka caawinayaan akhristaha in si qoto dheer loo fahmo macluumaadka ku xusan Xisaab-xirka. Sidoo kale waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin Xisaab-xirka.

1.2.5 Faahfaahino Dheeri ah

Faahfaahinnada la socda warbixintan waxa ay ka caawinayaan akhristaha in uu si qoto dheer u fahmo lacagaha sida kooban ugu xusan muuqaalada maaliyadeed. Qaybtan waxaa lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah xeerarka xisaabeed iyo faahfaahino kale oo sharaxaad dheeri ah bixinaya. Waxaa kale oo laga heli karaa caddaynta in la dhaqan galiyay shuruudaha ku xusan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Halkan hoose waxaa ku xusan warbixinada laga heli karo macluumaad dheeri ah oo loo baahanyahay in la faafiyo si kor loogu qaado heerka isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka maaliyadda dawladda.

1.2.6 Muuqaalka Qulqulka Lacagta Caddaanka ah

Muuqaalka qulqulka lacagaha caddaanka ah waxa ay faahfaahinaysaa qulqulka lacagaha caddaanka ah ee ku baxa ama ka soo xarooda arrimaha hawlfulinta shaqada Dawladda, hawlaha maalgashiga iyo hawlaha maalgelinta. Waxa ay si qoto dheer u faahfaahinaysa sida loo isticmaalay lacagaha caddaanka ah iyo meelaha laga helay sida soo daynsasho ama dib u bixin daymo lagu lahaa dawladda, soo iibsasho hanti ma guurto ah ama iska iibin hanti ma guurto ah.

2.0 DULMAR GUUD IYO FALANQAYN EE XISAABXIRKA JAN-MAR 2024

Dakhliga	Miisaaniyadda Sanadka	Dhabta Jan – Mar 2024	Haraaga	% Fulinta
Dakhliga Gudaha	346,183,627	91,713,350	254,470,277	26%
Deeqaha Dibadda	694,623,255	26,698,352	667,924,903	4%
Wadarta Guud	\$ 1,040,806,882	\$ 118,411,702	\$ 922,395,180	11%

Shaxda 1^{aad}: Odoroska iyo Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Mar 2024


Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024, waxaa la helay **11%** ee saadaalinta dakhliga miisaaniyadda. Dakhliga Gudaha waxaa la helay **26%**, halka deeqaha dibadda la helay **4%** miisaaniyadda sannadka 2024.

2.1 DHABTA DAKHLIGA DAWLADDA JAN – MAR 2020 - 2024


Dakhliga	Jan – Mar 2020	Jan – Mar 2021	Jan – Mar 2022	Jan – Mar 2023	Jan – Mar 2024
Dakhliga Gudaha	59,238,196	51,950,122	56,883,311	64,897,962	91,713,350
Deqaha Dibadda	65,141,367	24,967,607	20,471,484	15,983,438	26,698,352
Wadarta Dakhliga	\$124,379,563	\$76,917,729	\$ 77,354,795	\$80,881,400	\$118,411,702
Daymaha/Horumaris	-	-	35,925,668	-	-
libinta Hantida	-	-	3,285,354	-	-
Wadarta Maaligelinta	-	\$ -	\$ 39,211,022	\$ -	\$ -
Wadarta Guud	\$124,379,563	\$76,917,729	\$116,565,817	\$ 80,881,400	\$ 118,411,702

Shaxda 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Jan-Mar, 2020-2024

Wadarta dakhliga la lahay Saddex biloodlaha 1^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay **46%** dakhligii la helay rubaca koowaad ee sannadka 2023. Sida ka muuqato shaxda 2^{aad} ee Isbar-bardhiga ku saabsan dakhliga Dawladda Saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020 ilaa 2024, wuxuu muujinyaa kororka iyo hoos u dhaca dakhliga Dawladda ee sanadaha lasoo dhaafay. Dakhliga gudaha ayaa si mug leh u kordhay, \$59M oo la helay 2020, sannadka 2024 waxaa la helay \$92M.



Jaantuska 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Mar, 2020-2024




Jaantuska 1^{aad}: Boqolayda Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha

Deeqaha dibadda waxaa ugu badnaa deeqda la helay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2020, sanadaha kale waxaa ku yimid hoos u dhac deeqaha la helay saddex biloodlaha kowaad ee sannadihii ka danbeeyey. Inta badan deeqaha dibadda waxaa la helaa saddex biloodlaha labaad iyo wixii ka danbeeyo.

2.1.0 DAKHLIGA GUDAHA

Dakhliga gudaha oo ah dakhliga ugu muhiimsan Dawladda oo ay ku maalgeliso kharashaadka Dawladda ayaa lagu faah-faahin doonaa qaybaha soo socda. Sida ka muuqata jaanstuska 2^{aad} oo soo bandhigaayo boqolayda dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda ka yihiin wadarta dakhliga dawladda ee la helay saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020-2024. Sannadka 2021 dhabta dakhliga gudaha wuxuu ahaa 68% wadarta dakhliga la helay saddex biloodlaha kowaad ee sannadka, wuxuu sameeyey sare u kac sannadka 2022 wuxuu gaaray 74%, halka sannadka 2023 gaaray 80%.



Jaantuska 3^{aad}: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar, 2020-2024

Janstuska 1^{aad} wuxuu muujinayaa dhabta dakhliga la helay oo loo kala qaaday dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa ugu badan dakhlihiga la helay Saddex biloodlaha kowaad ee sannad kasta marka laga reebo sannadka 2020.

Deeqaha Dibadda ee la helay rubaca koowaad ee sannad kasta wuxuu ka hoosaayaa dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda waxay u badan yihiin deeqaha lagu

maalgeliyo mashaariicda Bangiga Addunka iyo Bangiga Horumarinta Afrika ay ka fuliyaan dalka.

Canshuurta	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dakhliga Canshuurta	35,820,989	39,118,742	41,314,196	45,444,644	65,767,125
Dakhliyada Kale	23,417,208	12,831,381	15,569,114	19,453,318	25,946,225
Wadarta Dakhliga Gudaha	\$ 59,238,197	\$ 51,950,123	\$ 56,883,310	\$ 64,897,962	\$91,713,350
% Koror/Naaqus	10%	-12%	9%	14%	41%

Shaxda 3^{aad}: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar, 2020-2024


Dakhliga Gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 41% dakhliga gudaha ee la helay rubicii koowaad ee sanadka 2023. Dakhliga ay dawladdu ka heshay gudaha ayaa kala ah; Dakhliga Cashuuraha ah iyo Dakhliyada kale ama dakhliga aan canshuuraha ahayn. Saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2021 ilaa 2024 dakhliga canshuuraha ayaa ka badnaa 70% wadarta dhabta dakhliga gudaha halka dakhliyada kale ka yaraa 30% wadarta dhabta dakhliga gudaha ee la helay.

Sida ka muuqata jaantustka 3^{aad} waxaa la helay dakhliga canshuurta saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 \$66M oo u dhiganta 72% dakhliga gudaha, halka dakhliyada

kale la helay \$26M oo u dhiganta 28% wadarta dakhliga gudaha. Dakhliga gudaha ee ugu badan wuxuu kasoo xaroodaa dakhliga canshuuraha.

2.1.2 Dakhliga Gudaha ee Billaha ah

Jaantuska 5^{aad} wuxuu muujinayaa dakhliyada gudaha ee soo xarooday saddexda bilood ee ugu horaysay sanadaha 2020-2024. Wuxuuna muqaal ka bixiniyaa kororka bilaha ee rubaca kowaad uu samaynaayey sanadaha lasoo dhaafay ee 2020-2024. Waxaa dakhliga gudaha ee ugu badan soo xaroodaa bisha Maarso marka laga reebo sannadka 2020.



Jaantuska 4^{aad} wuxuu muujinayaa kororka iyo naaquska boqolayda marka la is bar-bardhigo dhabta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan – Mar ee sanadaha 2020 ilaa 2024. Bisha Jan 2021 dakhliga gudaha aad ayuu uga hooseeyey dhabta dakhligii gudaha ee la helay bishii Jan ee sannadka ka horeeyey ee 2020. Dakhliga gudaha ee la helay bisha Jan 2020 wuxuu 86% ka badan dakhligii la helay bisha Jan ee sannadkii 2019.

2.1.3 Dakhliga Cashuuraha


Canshuurta	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Canshuurta Dakhliga, iyo Faa'iidada	2,413,454	3,017,152	4,129,416	3,993,951	8,781,565
Canshuurta Agabka iyo Adeega	4,921,355	5,809,206	6,685,925	6,698,099	12,493,168
Canshuurta Furdada	25,904,974	26,520,980	27,743,149	33,519,537	42,721,088
Canshuuraha Kale	2,581,205	3,771,404	2,755,707	1,233,058	1,771,303
Wadarta Dakhliga Canshuurta	\$ 35,820,988	\$ 39,118,742	\$ 41,314,197	\$45,444,645	\$ 65,767,124
% Koror/Naaqus	-1%	9%	6%	10%	45%

Shaxda 4^{aad}: Qaybaha Dakhliga Canshuuraha Jan-Mar, 2020-2024

Dakhliga canshuuraha ee ugu badan ee la helay saddexda biloodlaha ugu horeeyey sannadka 2024 waa dakhliga ka soo xarooda furdada oo laga helay \$43M una dhiganta **65%** dakhliga canshuuraha. Dakhliga canshuuraha ee labaad waa dakhliga ka soo xarooda canshuurta Agabka iyo Adeega oo laga helay **\$12M** oo u dhiganta boqolay ahaan **19%** wadarta dakhliga canshuuraha. Dakhliga sadexaad ee ugu badan waa dakhliga ka soo xaroodo Canshuurta Dakhliga iyo Faa'idada oo laga helay **9M** oo u dhiganta 13% wadarta dakhliga canshuuraha.

Dakhliga canshuuraha waxaa ugu badan dakhliga kasoo xarooday furdada oo ah canshuurta laga helo Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho. Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 waxaa la helay 43M oo u dhiganta 65% wadarta dhabta dakhliga canshuuraha ee la helay Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2023 canshuurta furdada ee la helay waxay ahayd 34M oo u dhiganta 74% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023.

Dkhaliga canshuuraha kororka ugu badan wuxuu sameeyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuuna kordhay 45% marka la bar-bardhigo sandkii ka horeeyey. Sannadka 2023 wuxuu kordhay 10%. Sannadka 2022 wuxuu kordhay 6%.



Jaantuska 6^{aad}: Dhabta Dakhliga Canshuurta Jan-Mar, 2020-2024

Sida ka muuqato shaxda 5^{aad} wadarta dakhliyada kale ee la helay saddex biloodlaha koowaad ee sanadka 2024 wuxuu ka badan yahay **33%** dakhligii soo xarooday saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii hore 2023. Dakhliga libka Agabka iyo Adeega ayaa ah dakhliga kaliya laga helay dakhliyada kale, wuxuu ka soo xarooday khidamadaha maamul ee ay bixiso Dawladda, dalkugalka, bixinta shatiyada ganacsiga, bixinta baasaboorada, iyo adeegyada Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha.

Khidmadaha Maamul ee Dekadda iyo Garoonka diyaaradaha Muqdishu waxaa ka soo xarooday 9.7M oo u dhiganta 37% wadarta dakhliyada kale. Khidmadaha diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay 6.7M oo u dhiganta 26% wadarta dakhliyada kale. Wadarta Khidmadaha maamul ee Dekadda, Garoonka diyaaradaha Muqdishu, iyo diyaaradaha mara hawada Soomaliya waxaa laga helay 16.4M oo u dhiganta 63% wadarta dakhliyada kale.

Adeega	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dakhliga Hantida	0	0	0	44,086	197,580
Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	23,417,208	12,831,381	15,569,114	19,409,232	25,676,598
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	0	0	0	0	72,047
Wadarta Dakhliyada Kale	\$ 23,417,208	\$ 12,831,381	\$ 15,569,114	\$ 19,453,318	\$25,946,225
% Koror/Naaqus	31%	-45%	21%	25%	33%

Shaxda 5^{aad}: Dakhliyada Kale Jan-Mar, 2020-2024

2.1.1 Deeqaha Dibadda

Deeqda	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Deeqaha Labada Dhinac	0	0	0	0	5,641,619
Deeqaha Dhinacyada Badan	65,141,366	24,967,607	20,471,484	15,983,438	21,056,733
Wadarta Deeqaha Dibadda	\$ 65,141,366	\$ 24,967,607	20,471,484	15,983,438	26,698,352
% Koror/Naaqus	1352%	-62%	-18%	-22%	67%

Shaxda 6^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan-Mar, 2020-2024

Deeqaha dibadda oo **67%** ka ah odoroska dakhliga ee miisaaniyadda sannadka 2024, waxaa la helay 67% ka badan deeqdii la helay saddex biloodlihii kowaad ee sannadkii hore 2023. Deeqda ugu badan ee lahelay ayaa ah deeqaha dhinacyada badan. Deeqda labada dhinac waxaa la helay sannadkaan 2024.

Deeqda Bixisay	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Imaaraatka Carabta	0	0	0	0	5,641,619
Wadarta	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 5,641,619.00

Shaxda 7^{aad}: Deeq labo dhinacle ah Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 7^{aad} waxay muujinaysaa dakhliga labada dhinac oo loogu deeqay Dawladda rubaca koowaad ee sannadka 2024 ee la helay ayaa ah deeq dhan **\$5.6M**, waxaana laga helay Dowladda Imaaraat Carabta.

Deeqda Bixisay	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Bangiga Addunka – IDA	45,938,522	13,067,995	13,618,539	2,300,242	4,073,394
Bangiga Addunka – MPF	18,432,899	11,291,682	3,868,496	12,259,663	15,481,130
Bangiga Hourmarinta Afrika	699,976	446,705	1,570,842	1,099,381	983,755
Sanduuqa Horumarinta Afrika	69,970	161,224	1,413,606	110,257	192,782
Ha'yadda Iskaashaiga Waxbarashada (GPE)	0	0	0	213,894	325,672
Wadarta Deeqada	\$ 65,141,367	\$ 24,967,607	\$ 20,471,485	\$ 15,983,440	\$ 21,056,737
% Koror/Naaqus	1352%	-62%	-18%	-22%	32%

Shaxda 8^{aad}: Deeqda Dhinacyada Badan Jan-Mar, 2020-2024

Wadarta Deeqda dhinacyada badan ee la helay saddex biloodlaha kowaad ee sanadka 2024, waxay ka badan tahay 32% deeqdii la helay saddex biloolaha koowaad ee sanadkii ka horeeyey 2023. Bangiga Adduunka ayaa 93% wadarta deeqaha dhinacyada ugu deeqay Dawladda. Waxayna isugu jirtaa IDA iyo MPF. Bangiga Horumarinta Afirka ayaa laga helay 6% wadarta deeqaha dhinacyada badan. Deeqda ugu badan uu lagu maalgeliyo mashariicda Dawladda waxaa bixiyo Bangiga Aduunka.

Faaf-faahin	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dakhliya Gudaha	59,238,197	51,950,123	56,883,310	64,897,962	91,713,350
Kharashka Dowladda	61,116,576	74,301,239	78,368,576	86,532,797	101,306,565
% Dakhliga Gudaha	97%	70%	73%	75%	91%

Shaxda 9^{aad}: Dakhliga Gudaha Vs Kharashaadka Dawladda Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 9^{aad} waxay soo bandhigaysaa is bar-bardhiga dhabta dakhliga gudaha iyo kharashaadka dawladdu bixisay saddax biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020 – 2024.

Sidoo kale shaxda waxay muujinaysaa boqolayda dakhliga gudaha ka dabooli karo kharashaadka Dawladda oo aan ku jirin kharashaadka mashaariicda lagu maalgaliyo deeqaha dibadda. Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 dakhliga gudaha wuxuu daboolay 91% wadarta kharashaadka Dawladda ay bixisay oo ayna ku jirin kharashaadka mashaariicda. Sannadka 2023 wuxuu daboolay 75% kharashaadka Dawladda.

Farqiga u dhaxeeya dakhliga gudaha iyo kharashaadka dawlada waxaa laga bixiyaa deeqaha kabka miisaaniyadda ay dawladdu ka hesho dibadda.

2.2 MIISAANIYADDA IYO DHABTA KHARASHAADKA EE SANNADKA 2024

Nooca Kharashka	Miisaaniyadda Sanadka	Dhabta Jan-Mar	Haraa	% Fulinta
Mushaarka Shaqaalaha	360,954,742	80,562,507	280,392,235	22%
Isticmaalka Agabka & Adeega	327,512,904	28,121,036	299,391,868	9%
Dulsaarka	9,800,000	156,205	8,879,456	9%
Kabka	13,160,000	1,659,990	11,500,010	13%
Deeqaha	218,490,715	13,915,882	204,574,833	6%
Faa'idada Bulshada	85,598,481	0	85,598,481	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	63,798,941	1,205,916	62,593,025	2%
Dib u Bixinta Daymaha	0	764,339	0	0%
Wadarta	\$ 1,079,315,783	\$ 126,385,875	\$ 952,929,908	12%

Shaxda 10^{aad}: Dhaqangelint Miisaaniyadda sannadka 2024

Dhaqangelinta miisaaniyadda ee saddex biloodlaha koowaad ee sannadk 2024, waxaa la bixiyey kharash dhan 126M oo u dhigma 12% saadaalinta miisaaniyada sanadeedka 2024. Mushaarka Shaqaalaha ayaa ugu sareeyey fulinta miisaaniyadda, **22%** miisaaniyadda Mushaarka Shaqaalaha Dawaldda ayaa la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey 28M oo u dhiganta **9%** miisaaniyadda sannadka.

Hay'adaha	Miisaaniyadda Sanadka	Dhabta Baxday Jan - Mar	Haraaga	% Dhabta
Hay'adaha Maamulka	382,907,771	49,423,096	40,034,952	13%
Hay'adaha Amniga	255,626,335	56,057,780	38,569,900	22%
Hay'adaha Dhaqaalaha	232,106,530	12,281,065	9,998,157	5%
Hay'adaha Bulshada	208,675,147	8,623,933	5,569,655	4%
Wadarta Kharashka	\$1,079,315,783	\$ 126,385,875	\$ 952,929,908	12%

Shaxda 11^{aad}: Dhaqan gelint Miisaaniyadda 2024 - Hay'adaha Dawladda


Shaxda 11^{aad} waxay soo bandhigaysaa sida loo fuliyey miisaaniyadda sannadka 2024, iyadoo loo fiirinaayo kala saaridda hay'adaha Dawladda. Hay'adaha Amniga ayaa ugu sareeya dhaqan-gelinta miisaaniyadda Dawaladda ee saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Hay'adaha Amniga waxaana la bixiyey 22% miisaaniyadda sannadka. Hay'adaha Maamulka ayaa la bixiyey 13% miisaaniyadda sanadka 2024. Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ayaa la bixiyey 9% miisaaniyadda sannadka 2024.

2.3 DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA JAN-MAR, 2020-2024

Hay'adaha	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Hay'adaha Maamulka	34,480,086	38,236,725	40,034,952	43,867,613	49,423,096
Hay'adaha Amniga	25,000,066	36,208,611	38,569,900	43,912,858	56,057,780
Hay'daha Dhaqaalaha	5,560,292	6,227,667	9,998,157	8,604,191	12,281,065
Hay'daha Bulshada	2,668,804	4,940,770	5,569,655	5,737,650	8,623,933
Wadarta Kharashka	\$ 67,709,248	\$ 85,613,772	\$ 94,172,665	\$102,122,312	\$ 126,385,875
% Koror/Naaqus	37%	26%	10%	8%	24%

Shaxda 12^{aad}: Dhabta Kharashaadka Hay'adaha Jan-Feb, 2020-2024

Kharashaadka Dawladda ee saddex biloodlaha koowaada ee sannadka 2024 wuxuu ka badan **24%** kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023. Kororka ugu badan ee kharashka wuxuu ahaa sanadaha 2020 iyo 2021 oo la bixiyey kharash ka badan



Jaantuska 7aad: Kharashaadka Hay'adaha Jan-Mar, 2020-2024

Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada waxaa lagu bixiyey **17%** wadarta kharashka la bixiyey saddex biloodlaha koowaada ee sannadka 2024.


Sannadka 2023 isku darka kharashka ku baxay Hay'adaha Amniga iyo Maamulka wuxuu gaaray **86%** wadarta kharashaadka Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka. Halka **14%** lagu bixiyey Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada wadarta kharashka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023.

2.3.0 Noocyada Kharashaadka

Nooca Kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Mushaarka Shaqaalaha	42,713,773	56,078,186	61,448,857	64,228,537	80,562,507
Isticmalka Agabka & Adeega	8,948,240	13,762,550	17,890,132	19,650,778	28,121,036
Dulsaarka	279,153	352,125	86,610	50,483	156,205
Kabka	0	135,228	0	320,000	1,659,990
Deeqaha	12,894,976	9,623,040	12,304,268	12,167,932	13,915,882
Fa'idada Bulshada	0	0	0	2,982,865	0
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	1,695,581	1,806,126	916,084	1,004,634	1,205,916
Dib u Bixinta Daymaha	1,177,527	3,856,519	1,526,714	1,717,083	764,339
Wadarta Kharashaadka	\$ 67,709,248	\$ 85,613,772	\$ 94,172,665	\$ 102,122,312	\$ 126,385,875

Shaxda 13aad: Noocyada Kharashaadka Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 13aad waxay muujinaysaa meelaha ay ku baxeen kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020-2024. Kharashka ugu badan ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 waa **80.6M** oo u dhigma **64%** waxay ku baxday Mushaaraadka Shaqaalaha Dawladda. Kharashaadka labaad ee ugu badan waa Isticmaalka Agabka iyo Adeega oo ku baxday 28M oo dhiganta **22%** wadarta kharashaadkii la baxshay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Deeqaaha la siiyo maamul goboleedyada dalka waxaa lagu bixiyey 13.9M oo u dhiganta **12%** kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024.



Jaantuska 8^{aad}: Kharashka Bille ah Jan-Mar, 2020-2024

Jaantuska 8^{aad} wuxuu soo bandhigayaa kharashka bille ah la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020 – 2024. Dhamaan sanadaha kharshaadka la baxsho waxaa ugu yar bisha Janaayo, waxaana ugu badan bisha Mar ee sannad kasta marka laga reebo sanadka 2020.


Bisha Jan waxaa la bixiyaa mushaaraadka shaqaalaha kaliya, kharashaadka kale ee dawladda waxaa la bilaabaa bixitaankooda bisha Feb sanad kasta.

2.3.1 Mushaaraadka Shaqaalaha


Nooca Kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Mushaarka	28,142,388	35,744,058	37,792,692	39,781,301	49,142,589
Gunnada	12,854,288	17,743,067	20,375,545	21,827,121	26,222,473
Kharashaadka Kale ee Shaqaalaha	1,717,096	2,591,062	3,280,620	2,620,116	5,197,445
Wadarta Mushaarka	\$ 42,713,773	\$ 56,078,186	\$ 61,448,857	\$ 64,228,537	\$ 80,562,507
% Koror/Naaqus	46%	31%	10%	5%	25%

Shaxda 14^{aad}: Mushaaraadka Shaqaalaha Jan-Mar, 2020-2024

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu 25% ka badan yahay mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023. Kororka ugu badan ee mushaarka shaqaalaha Dawladda wuxuu ahaa sannadka 2020, wuxuu gaaray koror dhan 46% ka badan mushaarkii la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2019. Sannadka 2021 wuxuu ka badan yahay 31% wadarta mushaarka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2020.



Jaantuska 10^{aad}: Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale



Jaantuska 9^{aad}: Boqolayda Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale

Bixinta mushaarka shaqaalaha Dawladda wuxuu samaynaayey koror laga soo bilaabo sannadka 2020 ilaa 2024, sida ka muuqato jaantuska 9^{aad} iyo 10^{aad} mushaarka shaqaalaha Hay'adaha Amniga waxaa la bixiyey saddex biloodlaha kowaad ee sannadka 2020 lacag dhan \$22M oo u dhiganta 52% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey, halka sannadka 2024 la bixiyey saddex biloodlaha koowaad lacag dhan \$47M oo u dhiganta 58% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey.

Mushaaraadka hay'adaha kale waxaa la bixiyey \$21M oo u dhiganta 48% wadarta mushaarka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey saddax biloodlaha koowaad ee sannadka 2020, halka sannadka 2024 la bixiyey lacag dhan \$34M oo u dhiganta 42% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey.


2.3.2 Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega

Nooca Kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Safarka iyo Shirarka	865,185	283,423	755,197	1,429,513	1,836,642
Safarka iyo Shirarka	865,185	283,423	755,197	1,429,513	1,836,642
Kharashaadka Hawl-Fulinta	1,347,846	1,705,515	2,579,039	3,189,692	4,184,058
Hawlaha Guud	490,363	468,482	543,334	711,197	725,763
Isgaarsiinta	0	0	0	33,112	46,543
Shidaalka iyo Saliidaha	378,617	572,290	939,880	1,110,343	2,116,130
Agabka iyo Alaabaha	281,262	389,210	723,900	821,504	892,771
Dayactir iyo Hagaajin	197,604	275,532	371,925	513,535	402,850
Kharashaadka Kirooyinka	188,334	455,268	264,465	476,080	810,390
Kirooyinka	188,334	455,268	264,465	476,080	810,390
Kharashaadka kale ee Hawl-Fulinta	2,822,852	4,733,765	7,177,098	6,982,889	12,419,692
Waxbarashada iyo Tababaradda	115,342	199,790	249,010	191,838	45,112
Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	1,399,012	3,431,456	5,279,334	5,655,041	10,596,643
Adeegyadda Bangiga	1,308,498	1,102,519	1,648,754	1,075,701	1,745,084
Xayeysiinta iyo Heshiis Wax kala libsi	0	0	0	60,309	21,853
Caymiska Dadka Guud	0	0	0	0	11,000
Hawlgaladda Ciidamada	1,398,317	2,103,581	140,000	1,171,508	1,236,118
Booliska - Agabka iyo Adeegyada	926,874	763,972	0	40,000	60,000
NISA – Agabka iyo Adeegyada	107,945	1,182,341	50,000	891,508	936,118
Xoogga- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	363,498	157,268	90,000	240,000	240,000
Kharashaadka Guud ee kale	2,325,706	4,480,999	6,974,334	6,401,097	7,634,136
Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	2,325,706	4,480,999	6,974,334	6,401,097	7,634,136
Wadarta Kharashaadka	\$ 8,948,240	\$13,762,550	\$17,890,132	\$19,650,778	\$28,121,036
% Koror/Naaqus	-27%	54%	30%	10%	43%


Shaxda 15^{aad}: Isticmaalka Agabka iyo Adeega Jan-Mar, 2020-2024

Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega, waa kharashka labaad ee ugu badan kharashka bilaha ah oo ay dawladdu bixiso bishii, 22% wadarta kharashka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu ahaa kharash ku baxay Isticmaalka Agabka iyo Adeega. Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu kordhay 43% marka la barbardhigo saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii hore 2023.


Kharashka ugu badan ee baxa saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 waa kharashaadka kale ee howl fulinta oo ku baxday 12.4M oo u dhiganta 44% wadarta kharashaadka ee baxay ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega.



Jaantuska 12^{aad}: Kharashaadka Safarka & Shirarka



Jaantuska 11^{aad}: Kharashaadka Howl-fulinta



Jaantuska 13^{aad}: Kharashaadka Kirooyinka


biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 70% kharashaadkii la baxiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023.

Kharashka Safarka iyo Shirarka ee la baxiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 ayaa ah 1.8M wuxuuna u dhigmaa 7% wadarta kharashaadka ku baxay Isticmaalka Agabka iyo Adeega. Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu kordhay 28% marka la bar-bardhigo saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii hore 2023. Kororka ugu badan waxa uu ahaa **166%** saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2022 marka la bar-bardhigo saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2021.

Kharashaadka Hawl-fulinta oo faah-faahintiisa ka muuqato shaxda 15^{aad} waxaa la baxiyey 4.2M oo u dhiganta 15% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la baxshay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Sida ka muuqato jaantuska 13^{aad} waxaa jira koror dhan 31% uu ka badan yahay kharashdii la baxiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023. Kororka ugu badnaa wuxuu ahaa 51% uu kordhay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2022 marka la bar-bardhigo saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii ka horeeyey ee 2021.


Kharashaadka ku baxay kirooyinka waxaa la bixiyey 0.8M oo u dhiganta 3% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la baxiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Kharashka kirooyinka ee la baxiyey saddex

Kharashaadka kale ee howl-fulinta waa kharashka ugu badan la bixiyey Isticmaalka Agabka




Jaantuska 14^{aad}: Kharashaadka kale ee Howl-fulinta

iyoo Adeega. Waxaa la bixiyey 12.4M oo u dhiganta 44% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024. Kharashaadka kale ee howl fulinta ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu 78% ka badan yahay kharashka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2023.



Jaantuska 15^{aad}: Kharashaadka Howlgalada Ciidamada

Kharashaadka howlgalada ciidamada waxay kordheen saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 6% marka la barbardhigo sannadkii hore ee 2023. Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2022 wuxuu sameeyey hoos dhac, wuxuuna ka hooseeyey 93% marka la barbardhigo kharashaadka la baxshay sannadkii ka horeeyey ee 2021.



Jaantuska 16^{aad}: Kharashaadka Guud ee kale

Sida ka muuqato jaantuska 16^{aad} kharashaadka kale ee guud wuxuu kordhay 19% saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 marka labar-bardhigo kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii ka horeeyey ee 2023. Kharashaadka kale ee guud waa kharashka labaad ee ugu badan kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega, waxaana la baxshay 7.6M oo u dhiganta 27% kharashaadkii baxay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024.

2.3.3 Dulsaarka Daymaha

Nooca Kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	1,436,346	399,981	86,610	50,483	156,205
Dulsaarka la Siinayo Dadka Degan Dalka	20,333	-	-	-	-
Wadarta	\$ 1,456,679	\$ 399,981	\$ 86,610	\$ 50,483	\$ 156,205

Shaxda 16^{aad}: Dulsaarka Daymaha Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 16^{aad} waxay muujinaysaa dulsaarka dayamaha ee la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2020 ilaa 2024. Waxaa la siiya hay'adaha caalamiga ah ee daynta mudada fog ku lahaa Dawladda.

2.3.4 Kabka

Nooca Kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Kabka lasiiyo Shirkadaha Gaarka ah aan ka Shayqaynin Maaliyadda	0	135,228	0	320,000	1,659,990
Wadarta	\$ -	\$135,228	\$ -	\$ 320,000	\$ 1,659,990

Shaxda 17^{aad}: Kabka Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 17^{aad} waxaa ka muuqdo lacagaha lagu bixiyo maalagelinta ee la siiyo shirkadaha yaryar, waxaa lasoo bilaabay sannadka 2021. Saddex biloodlaha koowaad ee Sanada 2024 waxaa la bixiyey lacag dhan 1.7M.

2.3.5 Deeqaha

Nooca kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	299,608	357,230	25,843	1,300,000	1,261,268
Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	12,595,367	9,265,809	9,909,018	9,822,316	10,666,338
Deeqaha Raasumaalka ah ee Qaybta kale ee Dowladda	0	0	2,369,407	1,045,617	1,988,276
Wadarta Deeqada	\$ 12,894,975	\$ 9,623,039	\$ 12,304,268	\$ 12,167,933	\$ 13,915,882
% Koror/Naaqus	66%	-25%	28%	-1%	14%

Shaxda 18^{aad}: Deeqaha Jan-Mar, 2020-2024

Kharashaadka deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka, Gobolka Banaadir iyo lacagaha lasiiyo hay'adaha caalamiga ah ay dawladdu xubinta ka tahay, waxaa la bixiyey 14M oo dhiganta 11% wadarta kharashaddka la bixiyey saddex biloodlaha kowaad ee sannadka 2024. Kharashaadka deeqaha waxay kordheen 14% saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024

marka la bar-bardhigo kharshaadkii la bixiyey saddex biloodlihii ka horeeyey ee sannadka 2023.

Hay'daha Dawladda	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	37,342	138,444	134,154	156,343	204,889
Rugta Ganacsiga Soomali	37,342	138,444	134,154	156,343	204,889
Dawladd Goboleedka Somaliland	115,000	0	9,000	0	0
Dawladd Goboleedka Puntland	1,628,356	1,313,750	2,001,152	2,707,980	0
Dawladd Goboleedka Jubbaland	1,412,604	918,688	1,248,902	880,075	1,174,985
Dawladd Goboleedka Koofur-galbeed	2,072,287	858,291	2,409,700	685,216	2,447,121
Dawladd Goboleedka Galmudug	1,100,657	585,117	945,994	793,371	1,416,078
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle	1,814,862	1,159,759	918,445	356,618	884,514
Maamulka Gobolka Benadir iyo Dawladda Hoose ee Muqdishu	4,376,920	4,153,317	4,476,923	5,131,986	6,322,138
Wadarta	\$ 12,595,368	\$ 9,265,810	\$ 12,278,424	\$10,867,932	\$ 12,654,614
% Koror/Naaqus	95%	-26%	33%	-11%	16%

Shaxda 19^{aad}: Kharashaadka la siiyey Dawlad Goboleedyada iyo Hay'ado kale Jan-Mar, 2020-2024

Deeqaha la siiyo Dawlad gobleedyada iyo Gobolka Banaadir waxaa loo wareejiyey ama adeegyo looga fuliyey lacag dhan 12.7M oo u dhiganta 10% wadarta kharashaadka dawladda ee la bixiyey saddex biloodalaha koowaad ee sannadka 2024. Saddex biloodalaha koowaad ee sannadka 2024 wuxuu kordhay 16% marka la bar-bardhigo deeqihii la bixiyey saddex biloodalaha koowaad ee sannadka 2023. Deeqalaha la siiyo maamul goboleedyada waxay isugu jiraan deeqo laga bixiyo dakhiliga gudaha ee Dawladda iyo kuwo laga bixiyo mashaariicda Bangiga Aduunka uu maalgaliyo.

2.3.6 Faa'idada Bulshada

Nooca kharashka	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag ahayn	0	0	0	2,982,865	0
Wadarta	\$ -	\$ -	\$ -	\$2,982,865	\$ -

Shaxda 20^{aad}: Faa'idada Bulshada Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 20^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadka lagu bixiyey faa'idada bulshada. Saddex biloodalaha koowaad sannadka 2024 lama bixin kharash. Waxaa kharasha ku dhaw 3M la bixiyey saddex biloodalaha koowaad ee sannadka 2023. Kharashkan waxaa maalgaliyo Bangiga Addunka waana lacag caddaan ah oo lasiiyo barakacayaasha iyo qoysaska nugul ee ku nool dalka.

2.3.7 Hantida aan maaliyada ahayn (hantida maguurtada ah)

Nooca Kharash	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	647,943	0	166,469	0	0
Qalabka iyo Mashiinadda	6,970	222,634	280,010	51,791	941,978
Hantida kale ee Maguurtada ah	1,040,668	1,583,492	469,606	952,843	263,938
Wadarta	\$ 1,695,581	\$ 1,806,126	\$ 916,084	\$ 1,004,634	\$ 1,205,916

Shaxda 21^{aad}: Hantida aan Maaliyadda ahayn Jan-Mar, 2020-2024


Shaxda 21^{aad} waxaa ka muuqda kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida ma guurtada ah, waxaa lagu bixiyey 1.2M oo u dhiganta 0.95% kharashaadka guud ee la baxshay saddex biloodlaha koowaad ee sanndak 2024. Wuxuuna kordhay 20% marka la bar-bardhigo kharashka lagu bixiyey iibinta hantida maguurtada ee sannadka 2023.

2.3.8 Dib u bixinta Dayamaha

Nooca Kharash	Jan - Mar 2020	Jan - Mar 2021	Jan - Mar 2022	Jan - Mar 2023	Jan - Mar 2024
Dib u bixinta Dayamaha	1,177,527	3,856,519	1,526,714	1,717,083	764,339
Wadara	\$1,77,527	\$ 3,856,519	\$ 1,526,714	\$ 1,717,083	\$ 764,339

Shaxda 22^{aad}: Dib u bixinta Dayamaha Jan-Mar, 2020-2024

Shaxda 22^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadkii ku baxay dib u bixinta dayamaha ee saddex biloodlaha koowaad ee sannadaha 2020 ilaa 2024. Waxaana la bixiyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 lacag dhan 746K, oo la siiyey wadanka Ruushka.


Abdirahman Mohamed Anas,
 Xisaabiyaha Guud-DFS

3.0 MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA

Dawladda Federaalka Soomaaliya


Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka

Ee Saddex Biloodlaha Koowaad ee Ku Dhammaaday 31 March 2024

	Fahfahin	2024 USD\$	2023 USD\$	% Farqiga
Dakhliga				
Dakhliga Canshuurta	1	65,767,125	45,444,644	45%
Dakhliga aan canshuuraha ahayn	2	25,946,225	19,453,318	33%
Deqaha Dibadda	3	26,698,352	15,983,438	67%
Wadarta Guud		118,411,702	80,881,400	46%
Kharashaadka				
Mushaarka Shaqaalaha	4	80,562,507	64,228,537	25%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	5	28,121,036	19,650,778	43%
Soo iibsasho qalab raa'sulmaal	6	1,205,916	1,004,634	20%
Deeqaha la bixiyey	7	13,915,882	12,167,932	14%
Dulsaarka Daymaha	8	156,205	50,483	209%
Kaalmo Dhaqaale	9	1,659,990	320,000	419%
Kaalmo Bulsho	10	0	2,982,865	-100%
Dib u bixinta daymaha	11	764,339	1,717,083	-55%
Wadarta Kharashaadka		126,385,875	102,122,312	24%
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Maarso		-7,974,173	-21,240,912	-62%
Haraaga Khaashka Bilowga Sannadka		98,757,409	81,001,443	22%
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Maarso		-7,974,173	-21,240,912	-62%
Haraaga Khaashka Dhamaadka Maarso	12	90,783,236	59,760,531	52%

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 12^{aad} lacag gaaraysa US\$ 50,543,780 & US\$ 25,897,159 oo ku jirta muuqaalka haraayada xisaabaadka Dawladda ku haray dhammaadka saddex biloodlaha koowaad ee sanadaha 2024 iyo 2023 waxay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo, loomana isticmaali karo ujeedo ka duwan sida lagula heshiiyey deeq bixiyayaasha.

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaabxirka ee ku qoran laga bilaabo boga 7^{aad} kuna eg bogga 44^{aad} waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaabxirka.


Abdirahman Mohamed Anas,
 Xisaabiyaha Guud-DFS

**4.0 MUUQAALKA ISBARBARDHIGGA SAADAASHA MIISAANIYADDA IYO
NATIIJADA DHABTA AH**
Dawladda Federaalka Soomaaliya
Muuqaalka Isbar-bardhig Miisaaniyadda iyo Dhabta
Ee Saddex Biloodlaha Ku Dhammaaday 31 March 2024

Dakhliga Miisaaniyadda/Kharashadaka	Faahfahinta	Kutalagalki Hore USD\$	Kutalaglkii Ugu Danbeeyey USD\$	Natijada Dhabtah USD\$	Farqiga udhexeeya Kutalagalkii iyo Dhabta USD\$	%Farqiga
Dakhliga						
Dakhliga Canshuurta	1	241,427,153	241,427,153	65,767,125	175,660,028	73%
Dakhliga aan canshuuraha ahayn	2	104,756,475	104,756,475	25,946,225	78,810,249	75%
Deeqaha Labada Dhinac	3	68,121,168	68,121,168	5,641,619	62,479,549	92%
Deeqaha Dhinacyada Badan	3	626,502,087	626,502,087	21,056,733	605,445,354	97%
Wadarta Dakhliga		1,040,806,882	1,040,806,882	118,411,702	922,395,180	89%
Kharashadaka						
Mushaarka Shaqaalaha	4	360,954,742	361,612,342	80,562,507	281,049,835	78%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	5	327,512,904	327,481,464	28,121,036	299,360,428	91%
Kaalmo Dhaqaale	9	13,160,000	13,160,000	1,659,990	11,500,010	87%
Deeqaha la bixiyey	7	218,490,715	216,389,195	13,915,882	202,473,313	94%
